


# BARASHADA AFKA HOOYO

# SUGAAN


*Waxaa Qorey:*

*MAXAMED XUSSEN HAD,*
*OTTAWA, ONTARIO*
*C A N A D A 199[illegible]*

887
56-A-282

# BARASHADA AFKA HOOYO

# SUUGAAN

*Dadweynahaan Hannuuninaa*
*Danta u Hagnaa*

IFTIINKA AQOONTA Series
© Copyright 1995
By Somali Canadian Cult. Association (SCCA)
ALL RIGHTS RESERVED
ISBN 0-9699945-0-8
First Print 1995 Ottawa, Canada

UNIVERSITA' DEGLI STUDI ROMA TRE ★ DIPARTIMENTO DI LINGUISTICA

## *ARDAYDA: DUGSIGA SARE*

Universita' Roma Tre
Dipartimento di Linguistica
ROMA TRE
A N 3499

*Waxaa Qorey: MAXAMED XUSSEN HADI*
*OTTAWA, ONTARIO*
*C A N A D A. 1993*

URURKA DHAQANKA EE SOOMAALIDA REER KANADA
SOMALI CANADIAN CULTURAL ASSOCIATION
1719 BANK STREET, SUITE 303. OTTAWA. CANADA. K1V 7Z4.
TEL. (613) 526-2075.

## TUSMADA BUUGGAN


*1. Gogoldhig*..........................................................................................
*2. Heello* ..........................................................................................1
*3. Maahmaayo*.....................................................................................4
*4. Buraanbur*........................................................................................6
*5. Wadaninimo*.................................................................................. 7
*6. Sheeko gaaban*............................................................................... 9
*7. Taariikhdii Wiil Waal*................................................................... 11
*8. Daalo Aragtideedaay*..................................................................... 13
*9. Murtidii Liibaan*.......................................................................... 17
*10. Jacaylkaan weli ku maagine*......................................................... 19
*11. Xumo iyo Samo*...........................................................................21
*12. Isgaba looma galo abaal*...............................................................23
*13. Allahayow nin ii daran*................................................................25
*14. Dagtayeey*.......................................................................... 26
*15. Waanadii Ugaas Nuur*...................................................................27
*16. Waa Su'aal da'weynoo*..................................................................28
*17. Dalkaygow*..................................................................... 31
*18. Xikmado afar afar ah*................................................................ 32
*19. Allahayow ii Gargaar*................................................................ 34

# GOGOLDHIG

Inkastoo mudda aad u dheer oo aan taariikh ahaan sugneyn lagu hadlaayey af-Soomaaliga oo aan qorneyn, haddana sugaantu waxay ahayd mid markastaba cabireysey heerka aqooneed, siyaasadeed & dhaqaneedba ee Bulshada Soomaaliyeed.

Qoris laa'antii afka Soomaaliyeed sababkasta ha ka mid ahaatee, waxay Ummadda Soomaaliyeed yar, iyo weynba tabeysaa sugaantii oon qoraal badan laga hayn, amase, mudadii taariikh ahaan ay soo martey oo intoodii badneyd aaney kaydsaneyn oo murtidii in badan oo aqoon fiican u lahayd ay la dhinteen ayagoo aan wax qoraal ah laga hayn.

Hadaba, buuggan oo aan ugu magac darey "Dadweynahaan Hannuuninaa Danta u hagnaa." Waa sugaan fudud oo ka kooban Heellooyin, Maahmaahyo, Taariikh, Buraanbur, Wadaninimo, & Sheekooyin tayo fiican leh.

Dadka dunida, khaas ahaan Bulshada Soomaaliyeed aad ayey u jecel yihiin dawaashada riwaayadaha, iyo dhageysiga maalımaayada iyo heesooyinka ku saabsan noloshooda, inta badanna dusha ayey ka xafidi jireen.

Soomaaliya waxay hodan ka tahay sugaanta aan qorneyn ee dadweynaha ku kaydsan xasuusta da'da waayeelka ah, siiba reer-miyiga. Sanooyinkan dambe, ka dib markii la qorey afkeena hooyo, baa loo soo jeestey soo ururinta iyo kaydinta hantida sugaaneed ee dalka. Qoraalkeygan kooban ulajeedadiisu waa in ubadkeena Soomaaliyeed ee qurbaha ku sugan ay wax ka bartaan suugaantooda baaxadda iyo tayada fiican.

Waxaan waalidiinta Soomaaliyeed, aqoon yahannada iyo indheer garatadaba ka codsanayaa in ay caruurteena fursad aad ah u siisaan, ugana sheekeysaan suugaanta Soomaaliyeed, waayo Carruurtu aad bey u jecel yihiin sheekooyinka waayeelku u tabiyaan ee yaabka, qosolka iyo jacaylkaba leh. Waa in lagu carbiyo aqoonta dhaqaneed ee dadkooda ee ku dheehan suugaanta aan qorneyn iyo murtideeda ee dalkooda hodanka ka yahay.

Sidaa darteed, tebinta suugaantu waa dhaqannololeedka Bulshada Soomaaliyeed, dhallaankuna waa hantideenii berri, oo u baahan inaan si haboon aan maskaxdooda u gelino suugaanteena tayada iyo baaxadda weyn leh.

Waxaan mahad ballaaran u celinayaa Muraad Cabdalla oo dhinaca sawirada iyo isku dubaridka buugan qayb libaax ka qaatay iyo Caafiyo Maxamad oo la'aanteed aanu hirgaleyn buuggan, ha ahaato xag makiinad garaacis & habeyntiisa guud.

Maxamad Xuseen Hadi

# CASHARKA KOWAAD

# HEELLO

Gorayadu ilmaheeda,
Aroori bay dhigtaayo,
Aboodigu ku layaa;

Shimbirtuna aroos ay,
Ilxidhoo ammana bay,
Ubadkeeda seexisaa,

*Kala awran labaduye,*
*Edebtiyo aqoontiyo,*
*Asluubtay isku dhaafeen,*
*caqligii wanaagsani,*
*Itaal inuu ka roon yahay,*
*Bal eegoo u fiirsada.*

Ilka weynow maroodigu,
Aradaduu mirtaa buu,
Cadawgu ka ugaadhaa,

Aboorkuna dudumadaan
Aragnay buu dhistaayoo,
Naftiisa ku ilaashaa,

*kala awran labaduye,*
*Edebtiyo aqoontiyo,*
*Asluubtay isku dhaafeen,*
*Caqligii wanaagsani,*
*Itaal inuu ka roon yahay,*
*Bal eegoo u fiirsada.*

Ma ogtihiin sagaaradu,
Awaarahay qoddaayoo,
Saaladeeda ku aastaa,

Libaaxuna ma asturee,
hilimaduu ku arooruu,
digadiisa ku aslaa.

*Kala awran labaduye,*
*Edebtiyo aqoontiyo,*
*Asluubtay isku dhaafeen,*
*caqligii wanaagsani,*
*itaal inuu ka roon yahay,*
*Bal eegoo u fiirsada,*

Waa bubaal in xikmadda Alle, markaad u fiirsato aad arki karayso sidaa makhluuqaadkiisu iskugu dheeli tiran yahay taasoo ay inoo muujineyso iney kala awran yihiin xayawaanku laba kasta oo uu abwaanku tusaale u soo qaatay. Kala awran labaduye, edebtiyo, aqoontiyo asluubtey isku dhaafeen. Caqligii wanaagsanii, itaal inoo ka roon yahay bal eegoo u fiirsadaa.

Murtidaa xigmadda badani waxay ku jirtey RIWAAYADII SHABEEL NAAGOOD, ee uu alifay abwaankii caanka ahaa Xasan Sheikh Muumin.

# LAYLI

Baro ereyada cusub:

Aroor(i) : biyo doonasho, wadada biyo doonashada.

Aboodigu : haadka jaad ka mid ah oo weyn oo afka iyo lugaha iyo baalasha dhinacyadooda guduudan yihiin .

Ilxidh(oo) : daah qolalka gudohooda lagu kala gooyo si aan lasugu muuqan ama ilxir.

Ammana(A): nabad, nabadgelyo, badbaado, colaad la'aan. Awaare: habaas, boor, siigo, bus.

Saalo : saxaro engegan oo iniino ah oo xoolaha iyo nafleyda kale qaarkeed dhigaan.

## CASHARKA LABAAD

## MAAHMAAHYO

Maahmaahda somalida xigmad weyn ayaa ku jirta, xigmadda Somaliyeedna way fare badan tahay.

Qof kasta oo Somali ah maahmaahda wax uun buu ka yaqaan. Maahmaahdu waxay ka hadashaa wax dhab ah. Somalidu been kuma maahmaahdo.

Maahmaahdu waxay u baahan tahay in si dhab ah, loogu fiirsado oo looga faalloodo. Runtu dhinacyo badan bay leedahay, sidaas daraaddeedna maahmaahdu waxay ka hadli kartaa dhinacyo badan oo kala jaad ah ee nolosha ku saabsan.

Bal maahmaahyahaan ka faallood, ee una fiirso;

1. Bohol hadimo ha qodin haddaad qoddana ha dheerayn ku dhici doontaana lama oga.
2. Dhicisku inta birta loo soo sido, ayuu bakhtiyaa.
3. Sagaaro laba tun oo la kala qaado ma leh.
4. Talo waa mar aad garan weyday iyo mar aad gaari weyday.
5. Ilko wada jir bay wax ku gooyaan.
6. Dhul hagar ma leh, dad baase hagar leh.
7. Ayax teg eelna reeb.
8. Nimaan weer sugin waran ma sugo.
9. Waxa uurkaaga ku jira afkaa kaa xada.
10. Laxiba shillalkay is dhigtaa lagu qalaa.
11. Dab munaafiq shiday mu'minkaa ku gubta.
12. Maroodigu takarta saaran ma arkee tan kale saaran ayuu arkaa.
13. Rag aamusay iyo riyo aamusayba reerkoodii gabe.
14. Tagto daayo timaaddo hay.

15. Af-xumo nabadna way kaa fogaysaa colaadna waxba kaagama tarto.
16. Calool bukootay carrab baa bogsiiya.
17. Doqontii Alle la jiraa faanta.
18. Caruuri habaas gashey oo hooyadood kula soo hoyatey.
19. Amma afeef hore lahow amma adkaysi dambe yeelo.
20. Nin kula hadlay kaa hadli.
21. Col naago la socdaan ma jabo.
22. Rag naagaa is dhaafshey.
23. Naag la'aan waa naf la'aan.
24. Sir naagood lagama sal gaaro.
25. Rag waa nin naag guursaday & nin naakira guursaday.
26. Cilmi dumar ninkii diiday waa u caruur la'aan.
27. Nin kaa naag wanaagsan weligaa ma gaartid.
28. Nin waa intii naag ka soo hartay.

# LAYLI

1. Maxaad ka taqaanaa maahmaayada Soomaaliyeed?

2. Sheeg laba maahmaahood oo dumarka u khaas ah?

3. Maxaad ka fahamtey maahmaahda ah:

   " Ilko wada jir bay wax ku gooyaan"

4. Maahmaahdu maxay ka hadashaa?

5. Maxaa loola jeedaa, maahmaahdan odhaheysa:

   "Ama afeef hore lahaw ama adkeysi dambe yeelo"

6. Sheeg shan maahmaahood oo qiraya qiimaha weyn


   ee kaalinta dumarka?


# CASHARKA SADEXAAD

## BURAANBUR

Meeradheeraw hayaan miiggan baynnu nahay,
Maalin iyo layl jid baa lagu majiiran yahay,
Milic qorrax ah mici caadaab weynle maylin qurac,
Mas duulaagiyo mariidlaw abees wax gana,
Waxaynnu dhex moosi doonna mashaakil badan,
Milil-kunooluhu asquu meel xille ugu dhiman,
Magli-kudhiigluhuna mugdiguu ku lumahayaa,
Meel-kutooskiyo waddanigaana marinka garan,
Ninkii mukhlisaa xaqlaa macallinkeennu yiri,
Majliska ka caddeeyay ay maalin weyn ahayd,
Waa maqleyseen markhaataana laga ahaa,
Waa midawnoo dariiq baynu wada marraa,
Mabda'a iyo ficilka waynu isla muujinaa,
Markaan maax gaarno waa miilo qaybsannaa,
Macnuhu kaasuu ahaayoo mid kale tarrixin.

# CASHARKA AFARAAD
# WADDANINIMO




1891 markii Talyaanigu qabsaday meelo badan oo xeebaha dhulka Soomaaliyeed ah, ayuu damcay inuu ku darsado magaalo la yiraahdo " Cadale" oo ku taal Woqooyiga gobolka benadir. Magaaladaasna, waqtigaas waxaa u Shiikh ahaa, nin la oran jiray Shiikh Axmed "Gabyow".

Talyaaniga iyo gumaysigiisana aad ayuu Shiikhu u diidanaa. Dabadeed, mar la warsaday oo la weydiiyey wuxuu Talyaniga ku diiday, wuxuu gabay masafo ah ku yiri:

Somali baan u dagaallamaynaa,

Dalkan ballaaran u daafacaynaa,

Kuwa dulmaaya la dood gelaynaa,

Kufriga soo degey diida leennahay,

Dantiinnu duul kale dhawrimaysee,

Ha daalinoo u dul qataa leennahay,

Dabaylkii mawdku intuu i daadahayn,

Hilibka duud cunin, oonan deeb noqon,

Dadka tusaan danihiisa leeyahay,

Durriyadaada dab looma aasee,

Kuwa dambaan u dariiq falayaa

LAYLI

1. Goorma ayey ahayd taariikhdii talyaanigu xeebaha soomaaliyeed qabsaday?


2. Degmada cadale xagay ku taallaa?

3. Kuma ayuu ahaa sheekha magaaladaas?

4. Gabayga sheekha maxaad ka fahamtay?

# CASHARKA SHANAAD

## SHEEKO GAABAN
## WIIL WAAL



Wiil Waal wuxuu ahaa nin geesi ah oo aad iyo aad u xujooyin badan. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu isugu yeeray raggii degannaa magaalada, wuxuuna u jeediyey khudbad aad u dheer, wuxuuna dabadeed ku yiri raggii waxaan rabaa in nin walba ii keeno hilib. Hilibkaasi waa in u ahaadaa ka ugu qurux badan ee nin rag ah la soo hordhigi karo.

Dhammaan raggii halkaas isugu yimid, waxa dhacaday in nin kasta uu qalo neefka xoolahiisa ugu tayada fiican si qof kasta uu u noqdo midka wuxuu la soo shir tagay lagu ammano.

Waxaa jiray nin aad u dan yaraa oo raggaas ka mid ah, oo aan haba yaraatee haysan wax uu la shir tago, ayaa isagoo aad u walaacsan ayuu gabadhii uu dhalay ka codsaday in ay neefkii keliya ee ay haysteen ay qasho, xubinta ugu quruxda badanna ay u diyaariso aabaheed oo in yar seexday.

Inantii waxay aabaheed u diyaarisay luquntii neefka, markii uu soo hurdo bogteyna wuxuu u yeeray gabadhii, wuxuu weydiiyey in ay u diyaarisay. Waxayna u sheegtay in ay u diyaarisay luquntii neefka, markaas ayuu ka codsaday in ay ka badasho. Inantii waxay ugu jawaabtay aabaheed " Aabbo ninku ma dooneyn inuu cunno ee wuxuu ka leeyahay ulajeedo, ee u qaad oo u gee." Odaygii isagoo aad uga xishoonayey luquntii uu qaaday ayuu soo galay goobtii lagu balamay.

Markii uu gaaray meeshii ayuu soo galay WIIL WAAL. Wuxuuna yiri qofkasta kor ha u taago hilibka uu sido. Odeygii xishood awgiis ayuuna hilibkii sare u taagin. WIIL WAAL oo isla markiiba arkey in odeygaasi uu wax qarinayo, markaas ayuu u yeeray oo uu yiri maxaad qarineysaa?

Odaygii oo ha-hakanaya ayaa u dhaqaaqay goobtii uu taagnaa WIIL WAAL, wuxuuna weydiiyey maxaad qarineysaa? Markaas ayuu tusay hilibka uu wado. Wuxuuna WIIL WAAL weydiiyey cidda kula talisay inuu qaado luqunta, wuxuuna u sheegay in ay inantiisu tiri qaad oo ulajeeddo ayuu ka leeyahaye.

WIIL WAAL oo u riyaaqay aragtida gabadhaas, ayaa odeygii weydiistay inuu u dhiso. Habeenkii arooska ayuu WIIL WAAL gabadhii uu u jeediyey xujo uu ugu sheegayo inay ureysato salaadda subax adinka horena inay foolato, adinka dambana ay dhasho. Gabadhii oo amarkaas fulineysa ayaa wax jamatay. Markaas ayey waxay codsatay in loogu yeero WIIL WAAL.

Waxay ku tiri " Waxaan jantay Goroyo gu'dhal ah oo xalay dhashay subageedii, iyo Lax gool ah madaxeedii. "WIIL WAAL oo arrintaas madax ka lulaya ayaa yiri: arrinkaasi suurtagal ma ahine maxay u jeedaa? Markaas ayey inantii u sheegtey in aysan suurtagal ahayn in ay ayaduna habeen keliya ku uureysato, kuna dhasho. Sheekadiina halkaas ayey ku dhammaatay.

LAYLI

1. Wiil Waal muxuu ahaa?

2. Xujadii uu odayaasha u jeediyey maxay ahayd?

3. Muxuu ku doortey gabadhii uu guursaday?


4. Maxay jamatay gabadhii uu guursaday?

5. Ma u keenay Wiil Waal gabadhu waxay jamatay?

6. Maxaad kale oo aad ka taqaannaa xujooyinka Wiil Waal?

## CASHARKA LIXAAD:

### TAARIIKHDII WIIL WAAL



Wilwaal wuxuu noolaa qarnigii toddoba iyo tobnaad. Wuxuu ku dhashay magaalada Jigjiga. Wilwaal wuxuu ahaa geesi iyo caadil. Xukunkiisa qofkii jebiyana ma uu cafin jirin. Somalinimadana wuu adkeeyey.

Wilwaal wuxuu ahaa gabayaa. Gabayadiisa wuxuu kaga sheekayn jiray goobihii dagaalka ee isaga iyo gaalada dhexmaray.

Isaga oo ku halqabsanaya Axmad Gurey, geesigii Somaliyeed ee furtay dhulka Itobiya qarnigii shan iyo tobnaad, wuxuu gabay ku yiri:

Gaaladii ka gees iyo ka gees webi ka soo guurtay.

Axmad Guray bar gooyey ee la dhigay goondar dhinaceeda.

Hadday guuto igu soo baxsheen waa gallad Ilaahe.

Goolyooy maalintaan iri darkii inay gashaan sheegtay.

(*) Gurey maalintaan dilay colkood inuu go'aan sheegtay.

UNIVERSITÀ DEGLI STUDI ROMA TRE ★
DIPARTIMENTO DI LINGUISTICA

Garbidaan ku tiirsaday ray inuu garab maraan sheegtay.

Gheeraarshe dheer iyo sagaal waran-galaan sheegtay.

Gacan iyo in gees laga dhihiyo gobanniman sheegtay
(Wilwaal)

*) Gaal Gurey: waa ninkii madaxda Xabashada ahaa markaas

LAYLI

1. Ma macnayn kartaa gabayga Wiil Waal?
2. Ma sheegi kartaa qarnigii uu noolaa Wiil Waal?
3. Maxaa u dhexeeya Axmed Gurrey iyo Gaal Gurrey?

## CASHARKA TODOBAAD

## DAALO ARAGTIDEEDAAY



Heestan oo ah hees jacayl ah oo dhexmartey Gabadh Aamina la yiraahdo iyo nin jeclaadey, waxa hal abuuray abwaanka caanka ah ee Cabdulqaadir Xirsi Yam-yam. Waxayna ku saabsan tahay Aamina oo calafkeedii noqday nin kale. Heestu waxay u qaybsantaa sadex qaybood, oo qaybta kowaad uu gabadha ku sifeynayo, qaybta labaadna wuxuu la dardaarmayaa ninka Aamina guursadey, qaybta sadexaadna wuxuu ka wal-wal qabaa haddii guurka Aamina uu xumaado.

### ERAYADII CABDULQAADIR YAM-YAM

Durdur iyo xareedeey,
doog iyo ugubaadeey,
dalanimada cadarkiyo,
dhibici iyo daruureey.
Ubax daray la moodyeey,
waabari hilaacaay,
makaay maankaa daray iyo,
Daalo aragtideedaay,
Daalo aragtideedaay.

Dayax iyo xidigahoo,
roobkay isku darayiyo,
dusha roob la dhaca iyo,
Daauus la moodyeey,
Daauus la moodyeey.

Diirimaadka laabtiyo,
daawadii naftaydaay,
taan hablaha ka doortaay,
dareenkeyga siiyaay,
xubno dabacsan leeyeey,
xubno dabacsan leeyeey.

Nabi Yuusuf dabadii,
tii dumarka quruxda leh,
haldoorkooda noqotaay,
haldoorkooda noqotaay.
Dambar iyo labeeniyo,
dahab midabkii leeyeey,
xuuralcaynta dunidee,
daawashada u timidee,
dalkaa lagu maneystaay,
dalka lagu maneystaay.

Hadduu diido calafkuna,
aqal laba daryaaloo,
aan xariir ku daahnoo,
inaan dahab wadaagno,
waayuhuna ina kala diro.

Anna kuma dudayee,
Allaa deeqda bixiyee,
naxariis da'weyn iyo,
ducaan kugu sagootiyey.

Ninka damacu raacee,
dooqu calanka saartee,
guur aad ka damacdee,
kugu gacan dambeeyana,
aan dardaaran siiyee.

Waa libin dadnimaduye,
Aamina kan doortoow,
deji meel barwaaqo ah,
diihaalka gaajiyo, dibin daabyo yey arag.

Daranyadu ma fiicnee,
yey ka noqon maryuhu duug,
ha u yaallo dahabkuna,
deris aan habboon iyo, yey dareemin qayladiis.

Dibedda iyo gudahaba,
meelaha la daawado,
ee dalxiiska loo tago,
ha il doogsatee gee.
Dusha nabar ha taabsiin,
ha dagaalin waa gobe,
hadal doqon ma garatana,
ha ku dayin ma yeeshee.

Waxaa dihatay hooyadii,
dadnimada ku beertoo,
aabaheedna waa diric,
raggna doorki weeyoo,
waa durriyada xalaalee, waalidkeedna daadihi.

Waxaa jira nin dooroo,
dantu ceeb u yeeshey,
waxaa Aamina u daran,
haddii waayuhu diidaan.
Soo doonoo waa garee,
annaa kuu diyaaree,
daryeelkeedu wuxu yahay,
xil aan duudka saaree,

Haddii taa aad ddidana,
dowga nolosha Aamina,
dayac noqoto waa qaan, waanan kula dacwinayaa.

## LAYLI

1. Buurta Daalo xagay ku taallaa?

2. Muxuu Daalo aragtideeda uu ugu sifeeyey?


3. Fanaanka heesa heestan hal abuuray maxaa la yiraahdaa?

4. Nuxurka iyo murtida heestan maxaad ka dhuuxday?

5. Macnee ereyadan:

| | |
|---|---|
| ubax daray | Waabari |
| haldoorkooda | sagootis |
| waa libin | diihaalka |
| il doogsi | gobb |
| dihasho | daranyo |
| diric | daryeel |
| xil | dowga |
| dayac | qaan |

# MURTIDII LIIBAAN



Murtida Liibaan, waa qiso ka dhacday wadanka Itoobiya, waxayna ku dhacday Wiilkaas Liibaan oo wadaninimo xumo muujiyey oo khiyaamadii uu sameeyey isaga markii dambe ku ridey xabsiga Alanbaqa ee magaalada Addis Abeba ku yaal oo si weyn loogu silciyey calaacalkiisii wuxuu yiri:

| | |
|---|---|
| Ninaa eersan maayo | oo waa waxaan galabsaday iyo abaal |
| Oogadeyda eegoo | ulahaas ku yaallaa |
| Abaalkayga weeyee | ninkaan hore u ogeynoow |
| Ku ishaaro qaadoo | ha u abraarin cadowgeen |
| Afkayga eegoo | ilkahaas ka maqani |

| | |
|---|---|
| Abaalkayga weeyee | ninkaan horow ogeynoow |
| Ku ishaaro qaadoo | ha u abraarin cadowgeen |
| Nin iimaan xumaadoo | arligiisa nacayoo |
| Ibliis daadahaystoo | ka eedoobay ehelkiis |
| Sideyduu u eedaa | wuxuu oon ku cuno iyo |
| Afartiisa waaxyood | iyo arag ku waayaa |
| Alla ummal i saaqyey | alla urugadeyday |
| Egga toobad keenee | ifka yaa i geeyoo |
| Iikeer uraayiyo | iga saara alanbaqa (*) |

(*) Waa Xabsi Addis Abeba Ku Yaal, oy dadka xabashidu ku silciso.

LAYLI

1. qisada murtidii liibaan xaggay ka dhacday?
2. Sideebuu u galay xabsiga?
3. Xabsiga maxaa la yiraahdaa?
4. Murtida Liibaan maxay ka hadlaysaa?
5. Fasir odhaahda ah:
   "ku ishaaro qaado ha u abraarin cadowgaa"

CASHARKA SAGAALAAD

# JACAYLKAAN WELI KU MAAGINE

Ujeedada heestan oo u hal abuuray abwaan Soomaaliyeed, oo isaga iyo qoyskiisiiba ay ka soo qaxeen, dhibaatooyinkii iyo burburkii ka dhacay Wadanka Soomaaliyeed, Magaalada Xamar. Dhibaatooyinkaas oo gaarsiiyey in qoyskiisii laba wadan oo kala fog ay ku kala noolaadaan awgeed ayuu u sameeyey heestan oo uu ku magacaabey Jacaylkaan weli ku maagine, wuxuuna yiri:-

Jacaylkan weli ku maagine hadduu
Xamar kugula meero hadduu
Mowjad ku saaro, haddana kula maax dabaasho
Intuu Marka kuula leexdo
Intuu Marka kuula leexdo
hadduu qool kugu maroojo
haddana magan kuu xereysto
malaha muran maad kartee
malaha muran maad karteen

Jacaylkan weli ku maagine hadduu
mugdi kugu wareeysto hadduu
maankiyo garaadkiyo hadduu maskaxdaada doorsho
Intuu meel ku astaansho
hadduu muuqaadan gaareen
haddana malab kuugu daadsho
malaha muran maad karteen
malaha muran maad karteen

Jacaylkan weli ku maagine hadduu
magac kugu baaqo haddana
maqal kugu filnaado, hadduu dhallan dhoolka maalmeed
Intuu socod kugu maqiiqo
Intuu socod kugu maqiiqo
haddii dadka kaad ka mudatay
haddana maya kugu yiraahdo
malaha muran maad karteen
malaha muran maad karteen

**LAYLI**

1. Ujeedada heesta maxay ka hadlaysaa?

2. Asbaabta kala kaxeeyey ninka iyo reerkiisii?

3. Fasir erayadan:

   Qaxeen
   Mowjad
   Maax dabaasho
   Qool
   Magan

4. Maxay kala yihiin erayadan:

   Maankiyo , Garaadkiyo, maskaxda

# CASHARKA TOBNAAN

## XUMO & SAMO

1. Waa baa waxaa deris ahaa fayoobi iyo cudur. Berigii dambe baa fayoobe u timid cudur oo ay ku tiri:

   Fayoobi: " Intaan maqnaa baad dhibaato weyn u geysatey dadkii, hadda waan imidoo dadkaan fayoobi siinayaaye, orod oo iskaga tagoo dhibaato dambe ha u keenin dadka cuduryow."

   Cudurbaa u jawaaboo, yiri: " Tegi mayo intay jiraan dad maato ah oo ay isugu jiraan waayeel iyo dhallaan, buu yiri cudur. "

   Dooddaas ka dib fayoobi iyo cudur colaad weyn baa dhex martay, weligoodna inaanay heshiinin ay isku afgarteen.

2. Tanaadnimo baa beri u timid saboolnimo oo ku tiri:

   " Dad badan baad silic iyo saxariir ku riddey; hadda waan imid si aan nolol fiican u siiyo dadkaad rafaadisaye, ee iskaga tag, anna hawlahayga aan kaa qabsadee."

   " Tegi mayo intay jiraan dad matabcadeyaal ah oon waxba naftooda tarayn, bay ku jawaabtey saboolnimadii."

3. Nabad baa beri u timid colaad oo ku tiri:

   Nabad: " Dadkii baad isku dirtayoo islaayey, dhibaataad keentay oo xasilooni baa laga waayey dunidii. Hadda waan imid, si aan u qaboojiyo guuldarradaase iska tag aan hawlahayga qabsadee."

   Colaad: " Tegi mayo intay jiraan qoysas iyo qaraabo isu caraysan."

Murti: " Inta ay diiddan yihiin cudur, saboolnimo iyo collaadi in ay tagaan, dadku nasteexo iyo barwaaqo heli mayaan, bay warisey sheekadani."

LAYLI

1. Fasir erayadan:-

   Fayoobi

   Cudur

   Saboolnimo

   Tanaadnimo

   Nabad

   Colaad

2. Maxay fayoobi ku tiri cudur?

3. Cudur muxuu ugu jawaabay?

4. Tanaadnimo maxay ku tiri saboolnimo?

5. Maxay ugu jawaabtay saboolnimo?

6. Murti ahaan maxaad ka fahamtay?

## CASHARKA KOW IYO TOBNAAD

## ISGABA LOOMA GALO ABAAL

Heestan oo ay hal abuureen abwaaniinta Soomaaliyeed ee ka qayb gashey shirkii dhawaan lagu qabtay magaalada Addis Abbeba ee dalka Itoobiya, laguna heshiisiinayey jabhadaha Soomaaliyeed. Waxay heestan ujeedadeedu ka hadlaysaa in dhibaatooyinka iyo burburka ka taagan Wadanka Soomaaliyeed ay xal u raadintiisa tahay oo kaliya dadkeeda oo garta, kuna waantooba falxumada dhacday, hantida burburtay iyo tirada aan la koobi karin ee dhimasho iyo dhaawacba iskugu jirta ee dagaaladan sokeeye ay keeneen.Waxayna ku tilmaameen qof nafsadiisii gabay looma galo abaal ee Soomaalaay garo intaa.

Adoo goob halis ah yaal
geeridu kugu xeeran tahay
waxaa lagu gacan qabtaayoo
gurmadku ku badbaadiyaa

Adoo horta galey dadaal
waxaad gaari weydayey
dantaadu ka gaabisaa
gargaar lagu sii kabaa.

Haddana gurigaaga dumay
gaddeed u dhistaa lahayn,
wallee gabalaaxsan doqon
garaad madhan baad sidaa.

Cid kaloo kuu waabta geed
waa tii gabbal kaa dhacaa,
isgaba looma galo abaalee
Soomaalaay, Soomaalaay,Soomaalaay garo intaa.

Markuu gaas kugu cartamay
dadkaagii yahay gel-gelin
dadkaa gaajiyo xabadi
goggaale ku qaybsadeen.

Dawlado kuu gaaxsan iyo
hay'ado gaar ah baa jiree
U.N ta oo gacan waxtar ah
geysanayaa jiree.

Haddana gurigaaga dumay
gadeed u dhistaa lahayn
wallee gabalaaxsan doqon
garaad madhan baad sidaa.

Cid kaloo kuu waabta geed
waa tii gabbal kaa dhacaa,
isgaba looma galo abaalee
Soomaalaay, Soomaalaay, Soomaalaay garo intaa.

LAYLI:

1. Halkee lagu hal abuuray heestan?
2. Ujeedadeedu maxay tahay?
3. Fasir tixdan:-

"Adoo goob halis ah yaal, geeridu kugu xeeran tahay,
waxaa lagu gacan qabtaayoo, gurmadku ku badbaadiyaa."

4. Maxaa loola jeedaa: isgaba looma galo abaal, ee Soomaalaay garo intaa.

5. Fasir erayadan, halkudhag la fahmi karana ka samee?
   - Dantaadu
   - Gaabisaa
   - Gabalaaxsan
   - Garaad madhan
   - Gelgelin
   - Gaaxsan
   - Gogaale
   - Gadeed

## CASHARKA LABA IYO TOBNAAD

## ALLAHAYOW NIN I DARAN ( UGAAS NUUR)

Gabaygan oo uu Ugaas Nuur tiriyey isagoo kaga hadlaya hufnaanta Siyaasaddiisa iyo qaabka uu ku maamuli jirey dadkiisa, wuxuu gabaygiisii tayada fiicnaa ku yidhi:-

Allahayow nin ii daran maxaan daafta hore seexshay
Nin i daaqsanaayana maxaan daafida u kariyay
Jidhku nimaanu doonayn maxaan hadalka deeqsiiyay
Ma degdagee xaajada maxaan ugu dulqaad yeeshay
Waji dabacsan daymo aan dareen galin dubaaqiisa
Debna furan dabuub uuna ka didin deexashiyo muuso
Qosol dibedda yaal oon ka iman dhuunta dacalkeeda
Kanaan degay kanaan doorkan biday kani dan baan mooday
Waxaa dood kaftan ah sheekada ugu daleeyaaba
Dabinkaan u dhigo maalintuu dagalka soo saaro
Intiiyoon dawaarka u rogoon xeelada u daadsho
Isagoon digniin qabin maxaan kaga dayaansiiyay.

Baro ereyadan soo socda:

daafta:

daafida:

dubaaqiisa:

dabuub:

deexashiyo:

daleeyaaba:

dagalka:

dayaansiiyay:

## CASHARKA SADEX IYO TOBNAAD
## DAGTAYEEY (UGAAS NUUR)

Ugaas Nuur wuxuu salaadda bilaabay isaga oo toban jir ah, mana dayacin waligii, hasayeeshee habeen habeenada ka mid ah ayuu seexday isaga oon tukanin, habeenkaas ayuu gabaygan tiriyey isaga oo ku calaacalaya, wuxuuna yidhi:

Adduunyadu waxay door lahayd soo dubaaxsadaye
Kursi dahab ah iyo xuural-cayn la isku darajeeyo
Dadaalkayga kuma helo halkaa door la soo bidaye
Haddana deeq Rabi ayaan sugi qalbigu iima diirane
Dagtayeey da'daan ahay miyaan xalay darab la'aan seexday
Sidee baan u dayacay salaadda daahanaan ahaye
Wadka aabahay dilay ee ani i doonaaya
Digniintaa la ii soo diree timaha loo doorshay
Gabadh doonan caynkeed warmaha igu dul meeraaya
Miyaan wali dimaaqayga galin daahanaan ahaye
Dagtayeey da'daan ahay miyaan xalay darab la'aan seexday
Sidee baan u dayacay salaadda uu Eebbe iga dooni
Dun la miiqay dawgaa ka yar ee duni xisaabteeda
Badh baa lagu dul marin diilinta ba'ane
Badh uun baa fardaha soo dul marin oo loo dabaaldagiye
Badh uun baa furaash loo dul dhigi ay luguhu diismaane
Dagtayeey da'daan ahay miyaan xalay darab la'aan seexday
Sidee baan salaadii u dayacay daahanaan ahaye
Dunnidani haday darajo leedahay Maxamed(*) baan laga dul qaadeene.

(*) waxaa loola jeedaa Nabi Maxamed (Calayhi salaatu wa salaam)

## CASHARKII AFAR IYO TOBNAAD
## WAANADII UGAAS NUUR

Kulan xusuus iyo qaddarin mudan oo lagu qabtay dixda Qabribaxar, oo ku taalla galbeedka waqooyi ee dalka Soomaaliya, laguna heshiisiinayey qabaailka Soomaaliyeed ee deggan Waqooyiga Soomaaliyeed.
Ugaas Nuur oo ka mid ahaa odayadii heshiiskaas maamulayey, gabaygan waanada iyo gubaabada isugu jira ayuu goobtaas ka tiriyey wuxuuna yidhi:

Soomaaliyeey Islaam baan nihiyo ubadkii Xaawaad eh
Ashahaadadii waan qirnaa tii islaanimo eh
Ma inkiro Rasuulkiyo Jibriiliyo aayadaha Qur'aanka ehe
Ololaha caroogaa onkodi uubatada yeedhi
Uus-aas adduun qaadid iyo dumar agoomaynta
Kani baa adduun reer ka dhacay ee hebel ha loo aaro
Islaanimo ma sheegine Ibliis amaradii weeyaan.

## CASHARKA SHAN IYO TOBNAAD

### WAA SU'AAL DA'WEYNOO

Heestan oo ku jirtey riwaayaddii Shabeel Naagood ee uu alifey amase uu hal abuurey abwaankii caanka ahaa ee Xassan Sheikh Muumin. Heestan oo ay daran doori ugu wada heeseen Hoobalada kala ah Cabdi Muxumed Amiin (Diiddane) iyo Hibo Maxamed (Diiddan). Waxay ka wada hadlayaan murti ku salaysan tilmaan la daahay, oo aan degdeg ku habbooneyn. Tilmaantaas oo aad u qoto dheereed, waxay ka hadlaysay siyaasadda Dalka Soomaaliyeed waqtigaas uu ku sugnaa oo aad mooddo iney asbaabaha burburka maanta ay sii saadaalinayeen. Akhristaw bal adoo deggan u fiirso, ujeedadaana bal is deeqsii, marka hore nafsadaada, marka xigana inta aan qadarisid.

DIIDDANE:

Doc kastoo laga eegoo
Nolosha dunidu waa dabkee
hadduu dabkii dhaxmoodo
maxaa lagu diiriyaa?
Waa tilmaan la daahoo
degdeg kuma habboonee
adoo deggan u fiirso
ujeeddadaa i deeqsii!

DIIDDAN:

Haddii ruux la doortoo
darajadii la saariyo
xilkii daryeeli waaya
dab dhaxmooday weeyee.
Waa su'aal da'weynoo
madaxa daalineysee
wixii lagu diirinaayo
dadweynahaa la weydiin.

DIIDDANE: Durdurkaa laga cabbaa
biyihii lagu dabaashaa
hadduu harraad dareemo
darkee laga waraabshaa?
Waa tilmaan la daahoo
degdeg kuma habboonee
adoo deggan u fiirso
ujeeddadaa i deeqsii!

DIIDDAN: Qofkii duunyo haystee
dahabkana barkanayee
wixiisu deeqi waayeen
durdur oomay weeyee.
Waa su'aal da'weynoo
madaxa daalineysee
darkii laga waraabin
dadweynahaa la weydiin

DIIDDANE: Qofkii cudur dilaayo
dawadaa bogsiise
hadday dawo bukooto
maxaa lagu dabiibaa?
Waa tilmaan la daahoo
degdeg kuma haboonee
adoo deggan u fiirso
ujeeddadaa i deeqsii!

DIIDDAN: Dallaa'imada diintiyo
distoorka iyo xeerka
haddii dabool la saaro
dawo bukootay weeyee
Waa su'aal da'weynoo
madaxa daalineysee
wixii lagu dabiibi
dadweynahaa la weydiin.

DIIDDANE: Subagga dufankiisaa
dadku ku dhaashadaayee
hadduu dufan basaaso
xaggee baa dux looga doonaa?
Waa tilmaan la daahoo
degdeg kuma habboonee
adoo deggan u fiirso
ujeeddadaa i deeqsii!

DIIDDAN: Dhaqanku dugsi weeyaan
dalkiisu uu ku dhaatee
haddii dadkiisu aaso
dufan basaasay weeyee
Waa su'aal da'weynoo
madaxa daalineysee
xaggii dux looga dooni
dadweynahaa la weydiin.

LAYLI

1. Adigoo is barbar dhigayaa, ujeedooyinka iyo murtida ay ku salaysan tahay heestan, iyo burburkii ka dhacay Wadanka Soomaaliyeed. Waxaad sameysaa qoraal (ESSAY) ka hadlaya arrintaas oo dhan laba xaashiyood oo aad si qayaxan uga hadlaysid waxyaabaha murtidu ay sabeebeyso?

## CASHARKA LIX IYO TOBNAAD

### DALKAYGOW

Casharkani wuxuu baraarujin u yahay, qofkasta oo Soomaali ah, oo weli qawmiyad iyo wadani jacayl ku jiro, waxayna digniin u tahay inta u haysata dibed ama qurbo ku noolaasho in uu ka wanaagsan yahay wadanka hooyo. Lama hurraan waa cawska jiilaal, meel wadankaaga kuu dhaantaana in aaney adduunka jirin, bal dhugo xigmadda murtidani ay ku salaysan tahay. Waxaa tiriyey abwaanka murtida badan ee Cabdi Muxumed Amiin, 1992kii, Shirkii dib u heshiisiinta Jabhadaha Soomaaliyeed.

Dalkaygow
Dalkaygow, dushaadu waa barwaaqee, dalkaygow
dabayshaadu way udgoontee, dalkaygow
dalxiis kaagaman imaanin, dalkaygow
meel aan kugu doorsanaayaa
miyey dunidaba ku taallaa, dalkaygow?

Inaan dibedaha wareego
inaan dawarsado shisheeye
qaxooti inaan dan moodo
dallaawe inaan ahaado

Waxay dantu igu xambaartay, dalkaygow
kolkii duulba duul wareemay, dalkaygow
kolkii nabad la isu diiday, dalkaygow
sokeeye kolkuu is dooxay
duqowdii la dhaafi waayey, dalkaygow
kalkay dihatee sun daacday
ayaan nafta la soo dalaabay, dalkaygow.

Dalkaygow
dushaadu waa barwaaqee, dalkaygow
dabayshaadu way udgoontee, dalkaygow
meel aan kugu doorsanaayaa
miyay dunidaba ku taallaa, dalkaygow.

# CASHARKA TODOBA IYO TOBNAAD

## XIKMADO AFAR-AFAR AH

Ummad kasta oo adduunkan ku nool waxay leedahay dhaqan u gaar ah oo ay ku soo bandhigto murtideeda dhaqan ahaaneed iyo suugaanteeda ayaga u gaarka ah. Dadna waa dadkii hore, murtina waa intey yiraahdeen. Waxaa taa u daliil ah, xikmadan afar-afarta ah ee uu alifey abwaankii weynaa ee Sh. Barkhadle Cabdullahi, waana sidatan soo socota:

Afar jidhkay doorisaa;
* *Hamiga badan*
* *Murugada badan*
* *Gaajada badan*
* *Soojeedka badan*

Afar naftay farax galisaa;
* *Geedo qurux badan oo la daawado*
* *Biyo socda oo saafi ah*
* *Ruux dumar ah ood jeceshahay*
* *Mudho aad u macaan*

Afarna indhay madoobaysaa
* *Qof aad neceb tahay oo waqti kasta aragtid*
* *Orod badan iyo kabo la'aan lagu socdo*
* *Oohin badan*
* *Khad yaryar ood akhriskiisa badiso*

Afarna jidhkay adkaysaa;
* *Dhar xariir ah oo la huwado(Dumar keliya)*
* *Biyo wanaagsan oo goor walba lagu maydho*
* *Cunto macaan oo nafaqo leh*
* *Udgoon aad ursato*

Afarna wajigey doorisaa, baabiisaana quruxdiisa;
* *Beenta badan*
* *Xishood la'aan*
* *Baryo badan*
* *Xumaan samayn badan*

Afarna wajigay qurxisaa;
* *Qof wanaagsan oo edeb leh*
* *Balanka oo la oofiyo*
* *Deegda*
* *Cabsida Alla*

Afarna Cadhada Alla ayay keentaa;
* *Cayda badan*
* *kibirka badan*
* *Xaasidnimo*
* *diro diraalenimada*

Afarna arsaaqda ayay kordhisaa;
* *Habeenkii oo daacadda Alla lagu soo jeedo*
* *Dembi dhaafka Alla oo la badsado*
* *Alla oo la xuso aroor iyo galaba*
* *Sadaqada oo la badiyo*

Afarna arsaaqaday yaraysaa;
* *Aroortii oo la seexdo*
* *Salaad yari*
* *Caajis badan*
* *Khiyaamo badan*

Afarna fahmada ayay kaa xumaysaa;
* *Cunto nafaqo yar*
* *Qadaadka oo loo seexdo*
* *Hamiga badan*
* *Murugada badan*

Afarna caqliga ayay kordhisaa;
* *Hadalka maalaayacniga oo laga fogaado*
* *Cadayga oo la badsado*
* *Dadka wanaagsan oo lala saaxiibo*
* *Culimada xagga diinta oo la jeclaado.*

## CASHARKA SIDEED IYO TOBNAAD

### ALLAHAYOW II GARGAAR

Arday baan ahayow
Arday baan ahayow
Ubaxii wadankaan ahayow

Waxaan u ordayaa, u ordayaa
Dugsiyada u aadaa
Inaan aqoon kororsadoo
Dadkayga anfacee
Dadaalkii la imidee
Allahayow ii gargaar, Aamiin Aamiin
Allahayow ii gargaar.

Waxaan u ordayaa, u ordayaa
Dugsiyada u aadaa
Inaan Hooyo iyo Aabbe
Abaalkoodii gudee
Dadaalkii la imidee
Allahayow ii gargaar, Aamiin Aamiin
Allahayow ii gargaar.